Warqad ku socoto Bulshada (e-news)

Ku Socoto Xubnaha Bulshadayada iyo Wadahawlgaleyaashayada,

Isbuucyada soo socda, waxaa *The Oregonian* lagu daabici doonaa maqaal ku saabsan maamulka guryeynta ee dalka oo dhan iyo radhoon; Home Forward ayaa ka soo muuqan doonto warbixinta. Waxaan ula shaqeynay si dhow wariyaha, waxaana dooneynaa inaan kuu sheegno in yar oo taariikh ah oo ku saabsan dadaalayada lagaga baarayo lagagana yareynayo halista radhoon maalgalintayada guryaha dawladda, iiyo hababka aan ula qabsaneyno innagoo si dheeraad ah u sii baraneyno hababka ugu wanaagsan ee loo wajaho shaqada.

Gudaha 2013, HUD ayaa soo saartay ogeysiin ku socota maamulka guryeynta oo ku dhiirogelinaysa inay baaraan oo yareeyaan halista radhoon. Wixii ah khataraha kale ee bay'adda sida rinjiga macdanka, HUD waxay ka rabtaa maamulka guryaha inay qaadaan tallaabooyin gaar ah oo lagu aqoonsanayo loogana wax qabanayo halista, loogana wargalinayo degganeyaasha jiritaankiisa iyo in diiwaan la geliyo natiijooyinkayaga. HUD sidoo kale waxay bixisaa dhigaalo si ay u taageerto shaqadan. Wixii radhoon ah, HUD ma laha shuruudo noocaas ah, mana bixiso wax lacag ah oo cayiman oo loogu talagalay shaqadan.

Iyadoo loo marayo Ambaqaadka 85 Dabaq, Home Forward ayaa ku hawlaneed dib u maalgelinta iyo bixinta shaqada dib uhabaynta ee muhiimka ah ee maalgelintayada guryaha dawladda . Waxaan tan u adeegsanay sida fursad aan ku baarno oo ku yareyno halista radhoon iyadoo aan dayactireyno guryahayaga, sidoo kalana aan ku qabanno shaqo kale oo muhiim u ah taasoo wanaajinaysa xaaladaha caafimaadka iyo amniga ee deggeneyaashayada. Ka sokow wax ka qabashada halista radhoon, shaqooyinkayaga kale qaarkood waxaa ka mid ah:

- Beddelida saqafka, derbiyada iyo daaqadaha si looga hortago galista biyaha ee horseedi karta inuu qurmo oo caaryeysto.
- Kordhinta adkeysiga dhulka ee dhismayaashayada dhaadheer si loogu diyaariyo dhulgariirrada waaweyn;
- Beddelida nidaamka HVAC (Kuleyleynta, haweynta, iyo aarkudheeshinka) si loo wanaajiyo tayada hawada gudaha.
- Casriyeynta nidaamyada korontada iyo ku darida astaamaha baadqabka ee yareeya halista dabka iyo daadadka;

- Ku biirinta astaamaha duuddooyinka ADA iyo goobaha dadweynaha kuwaasoo kordhiya badqabka iyo galaangalka; iyo
- Ku biirinta ama casriyeynta nidaamka ammaanka iyo iftiinka si loo wanaajiyo badqabka.

Shaqadan waxaa loogu baahan yahay si baaxad leh iyadoo ugu wacan tahay goynta maalgelinta guryaha dawladda tobanaan sano. Qaran ahaan, baaqashada dayactirida raasumaalka ee looga baahan yahay guryaha dawladda waxaa lagu qiyaasaa inay ka badan tahay $40 bilyan, iyadoo kumanaan kun oo guryaha dowladeed ah halaabeen iyadoo ugu wacantahay joogteyn la'aanta maalgelintan.

Markaan dhammeysireyno ambaqaadkayaga 85 dabaq, waxaan maalgelin doonaa $150 milyan oo hawlaha dayactirka ah si loo hubiyo in guryaha dawlada ee bulshayada loo dhawro jiilalka soo socda, iyo in deegaannada ku xeeran ay amaan badan yihiin oo ay soo jiitaan dadka aan dejinno.

Gudaha 2018, *The Oregonian* ayaa arkay in Home Forward qandaraas ku bixinayeen baarista iyo wax ka qabashada radhoon, lagu muujiyay warbixintayada dadweynaha ee hawlaha qandaraasyada. Sannadkii iyo barkii la soo dhaafay, maadaama aan sii wadnay hawshayada dayactirka muhiimka ah, oo ay ku jiraan baarista joogto iyo yareynta radhoon, *The Oregonian* waxay cilmi-baaris iyo wareysi ula yeesheen ilo si ay u sameeyaan warbixin. Waxaan si buuxda ula shaqeynay baaritaankooda, waxaan uga jawaabnay tobaneeyo su'aalood oo faahfaahsan, waxaan waqti go'an oo macquul ah ku siinay kumanaan iimaylo iyo dukumiintiyo, oo ma aynan ku dalacin wax lacag ah.

Intii aan wadnay, waxaan ogaanay in sameysiga siyaasadayada ku saabsan radhoon iyadoo aan la helin jihayn muhiim ah iyo sharciyeynta HUD, ama hay'ad kasta oo kale oo sharciyeyn, macnaheedu ay tahay inaan barannayno iyadoo aan sii soconno. Iyadoo lagu saleynayo barashadaas iyo ka jawaabista jawaab-celinta degganeyaashayada ee ku saabsan hirgelinta hore ee barnaamijka, gaar ahaan ku xeeran sida aan u bixinno macluumaadka, waxaan sameynay isbeddelada soo socda:

- Waxaan ka saarnay baarista iyo yareynta halista radhoon jadwalka dayactirka guryaha dawladda, sidaa darteed howsha si dhakhso ah ayaa loo dhammeystiri doonaa. Waxaan baari doonnaa oo wax ka qaban doonaa dhammaan guryaha dadweynaha marka la gaaro dhammaadka 2020, waxaana ku dadaalnaa inaan u dhammaystirno sida ugu dhaqsaha badan.
- Waxaan caddeynay waqtiga la cayimey kaasoo degganeyaasha lagula socodsiin doono in radhoon laga dhex helay gurigooda iyo goorta la filaayo in shaqada yareynta halista ay dhacdo. Waxaan ogeeysiintan ku bixin doonaa natiijooyinka gaarka ah ee baaritaanka iyo agabyo waxbarasho.
- Waxaan warqado u direynaa dhammaan degganeyaasha guryahayaga dawladda ee aan guryahooda wali la baarin si aan u ogeysiino in baaritaanka iyo wixii yareynta halista ah ay dhici doonto dhamaadka 2020. Waxaan bixinay dhigaalo macluumaad dheeraad ah, iyo sidoo kale agabyo waxbarasho oo ku saabsan dhimista ururka radhoon ee goobaha lagu nool yahay.

- Waxaan sameynaynaa jadwal asal ah oo loogu talagalay maalgelinta guryahayaga la awoodi karo, waxaana u diri doonaa macluumaad kireysteyaasha ku jira guryahan kuwaasoo aan horay loo baarin si ay u ogaadaan waxa la filan karo..
- Waxaan ka sameynay bog weebsaydkayaga http://www.HomeForward.org/RadonInfo halkaasoo degganeyaasha iyo xubnaha bulshada ay ka heli doonaan Su'aalaha Badanaa Lana Wediiyo (FAQs), siyaasadayada radhoon, tallooyinka lagu wanaajinayo tayada hawada gudaha, xiriiriyeyaasha dhigaalada caafimaadka dadweynaha iyo intaas ka badan.

Waxaan ku boorineynaa Golaha Mareykanka inay u qoondeeyaan kheyraad lagaga maalgeliyo shaqadan guryaha dadweynaha ee kale, iyo inay HUD kala shaqeyso EPA helida qaab-dhismeedka sharciyeynta si loola hago maamulka guryaha dawladda dadaalkan. Innagoo aqoonsanayo inuu radhoon ku yahay dhibaato caafimaadka guud uuna saameeya bulshada ku nool dalka oo dhan meel kasta ay ku sugan yihiin iyo goobaha shaqada, waxaan ka codsaneynaa taageero ah in hay'adaha caafimaadka gobolka iyo dawladda ay bixiyaan dhigaalo iyo sharciyeyn si looga ilaaliyo dhammaan muwaadiniinta khatartan.